Kaadhka Daahfurka!

Somali

Ma ka heli kartaa meelahan gaaka ah beerta?



Beerta Nibiriga Boorka Ah

Iska dhig inaad tahay kalluunka salmon oo badwaynta kujira. Dabbaal ku mar hareeraha Nibiriga Boorka ah si aad u aragto jidhkiisa oo dhan. Qaybahee ayey dhirtu matashaa?

Beeraha Bustaanada Ah

Ku naso meesha ku xigta dhirtan ka baxaysa carrada biyo nacday, ee ka baxaysa gudaha shay carruurtu ku dabbaashaan markii ay yaryar yihiin! Ma soo heli kartaa “tilmaanta buluugga ah”?



Beerta Barkadda Mawjadda

Waxaad dabbaalanaysaa meel ku dhaw biij dhagaxaan leh, oo leh dhir u eg xayawaan oo aad ku arki karto mawjadda hoose. Dhirtee ayaa u eg Sea Anemones? Ma heli kartaa 2 barkadaha mawadda ah?



Beerta Kalluunka Xiddigta

Dabbaal ugu tag mid kasta gacmaha kalluunka xiddigta, oo si dhaw ugu fiirso dhirta ka ag dhaw. Sidee caleemahooga, ubaxyadu uga duwan yihiin midba kan kale, ama iskugu mid yihiin?



Dariiqa Nolosha Kalluunka Salmon

U dabbaalo dhinaca ka soo horjeeda socodka biyaha oo ku naso barkadaha, iyadoo dhir iyo xayawaan meel kasta yihiin. Iska ilaali dhirbaaxada madax-kutida iyo xayawaanka kale ee dadka cuna!

Dhulka Sare

Hambalyo- waxaad soo gaadhay meelaha ay kalluunka iwm. ay ugxanta dhigtaan! Hadda dib u fiiri qof oo hel dhammaan meelaha aad soo dabbaaltay. Ilaa intee ayaad arki kartaa?

Magnuson Children’s Garden

-growing a love of nature and gardening



Dirxiga Qurminta

Dhammaan makhluuqaadka carrada kujiraa wuxuu burburiyaa caleemaha iyo dhirta dhintay waxayna ka dhigaan qoosh fiican, oo kuwa ku nool salladdan waxay ka dhigaan qooshkooda wixii khudaarta midhaha ah iyo tan cagaaran ee aynu reebno! Imisa kamid ah makhluuqaadkan ayaa hore u aragtay?



Qoryaha Kuuska ah

Qoryahan iyagana sidoo kale waa la burburiyaa! Ma tiring kartaa wareegyadooda jirridda, oo aad ogaan kartaa daloolada unkanka halkaasi oo laamuhu ka baxeen? Waa maxay shayada aad aragto ee agagaarkaaga ee geedaha laga sameeyey?

Beerta Faxlaha

Dhammaan ubaxyadan waxa laga helaa dhabaq iyo faxal oo ay ka helaan shinnida, balanbaalista, shimbiraha, iyo cayayaanka kale ee faa'idada leh! Imisa faxlayaal ayaa halkan ku arki kartaa hadda?

Guriga Geedka Willow

Laamaha Willow waxay awood gaar ah u leeyihiin biqlinta xididada, si ay markaaba uga mid noqdaan jirridaha geedka oo laamahooga gaarka leh! Imisa laamood ayaad ka tiring kartaa?

Isrogrogista Daaqa Dushiisa

Tani waa meel madadaalo badan marka la eego carruurta yaryar oo ay isrogrog kaga tagi karaan taagga! Iska dhig dhibic roob, dhagag, ama qori marka aad isrogrogayso. Sideed dareemaysaa?

Fadlan igu celi koodhida!

Ka hubi websaytkayaga hawlo madadaalo oo badan oo aad guriga ku samayn karto:

ww.magnusonchildrensgarden.org